

WAX KU KARSO AMA KEEG KU SAMAYSO

Dariiqadda cuntooyinka lagu kariyo dibedda

Cunto yar oo fudud ayaa noqon karta casho macaan markaad joogto dabiiciga - wax badanna gurigaad ku soo diyaarsan kartaa. Dab furan dushiisa oo lagu dubto korv, maraq lagu diiriyo ama sandwiiyo kulul oo lagu sameeyo, waa saddex cunto oo fudud oo lagu samayn karo deegaanka dabiiciga.

Waxa kale oo la samayn karaa waa iyadoo la iibsado pizza-kit. Dabka agtiisa ayaad cajiinka subag ku marinaysaa oo sonkor iyo budo qorofal ku yara dul daadinaysaa. Isku duub oo lakabyo yaryar oo sentimitir ah u jarjar. Ku rid kanel-bullaha daawe saliid leh oo ku dabool si uu foorno oo kale ugu noqdo. Dhinac walba shan daqiiqo ayaa ku filan. Kadibna ku raaxayso kanelbulle diirran!

Xusuusnow in dabka la shidayo had iyo jeer loo sameeyo qaab ammaan ah. Waa muhiim in qof weyn idinla joogo.

Krabbelurer (baankayk yaryar)

Waxyaabaha ay ka kooban yihiin ilaa 15 xabbo
Waxa lagu diyaariyaa girgiraha dibedda ama daawe dab furan saaran

1 dl sonkor	1 krm milix
4,5 dl daqiiq	2 ukun
2 tsk bikinbowdher	1,5 dl caano
2 tsk vaniljsocker	+ subag/badhar, dubitaanka

Dariiqadda diyaarinta

1. Isku qas sonkorta, daqiiqda, bikinbowdher, vaniljsocker:ta iyo milixda baaquli
2. Ku dar ukunta iyo caanaha, oo walaq qooshka
3. Ku shub quraarad, kaydi ama samee qooshka isla maalintaa
4. Dub 2-3 daqiiqo dhinac kasta

Pinnbröd (rooti-qori)

Waxyaabaha uu ka kooban yahay ilaa 10 xabbo
Lagu samaynayo dab furan korkii

2 1/2 dl daqiiq
1 tsk bikin-bowdher
1/2 tsk milix
1 dl biyo

Diyaarinta

1. Isku qas daqiiq, milix iyo bikin-bowdherka
2. Ku dar biyaha
3. Cajiinka u qaybi 10 qaybood oo siman
4. Kuusaska cajiinka ah dherer dhuuban ka dhig oo ku wareeji qori yar
5. Rootiga ku dul dub dhamac



FRILUFTS
FRÄMJANDET

